

Sida aad Maaskarada Nadaafada ah si sax ah u isticmaali lahayd

Ila bisha 5aad 2020, waxaa Iswiiska dib u furmeen Dukaamada, Suuqyada, Madxafyada, Maktabyada iyo Iskoolada waajibka ah (Dugsiyada dhexe iyo hoose). Bisha lixaad 2020 waxaa dib u furmi karaan meelaha kale. Si kastaba Nolosha sidii hore ma aha.

Waxaan dhamaanteen ku noolnahay hada qaab cusub oo caadi ah. Fayruska Corona ma aha in uu xoog u sii faafo. Sidaa darteed dhamaan bulshada ku nool Iswiiska waa in aay ilaaliyaan Qodobada:

- Qof walbo waa in uu qofka kale uu ka fogaadaa. Sida ugu fiican 2 mitir. Haddii xitaa 2 qofood isla joogaan.

Marxaladaha qaar waxaa fiican in aad xirato maaskaro, oo afka iyo Sanka aad dabooshid:

- Haddii dadka kale aad ka fogaan karin 2 mitir sida Gaadidka dadweynaha (Baska, Taraamka, Tariinka)
- Ama hadaa joogtid meel dadka kale eey xiranyihin Maaskaro sida Tima jaraha

Warbixino ku saabsan Maaskarada


- Maskarada kaama difaacdo in fayruuska Corona u kugu dhaco.
- Maaskarada waxeey Ka hor tagtaa qofkii Xanuunka horey u qabay in uu qof kale qaad-siiyo. (markuu xanuunka kugu dhaco ilaa u ka soo baxo waxeey qaadataa 5 ila 14 maalmood. Qofka asagoo Xanuunka qabo ayuu hadana u muuqan karaa qof Caafimaad qabo).
- Xitaa dadka Garka leh weey xiran karaan Maaskarada. Waxaa muhiim ah in Sanka iyo Afka la daboolo.
- Xitaa dadka xirto Okiyaalaha weey xiran karaan Maaskarada. Maaskarada waxeey ciriirin doonta lafta Sanqaroorka.
- Okiyaalaha maaskarada ayaa laga dulxiranaa Caruurta qasab ma aha in ay xirtaan maaskarad.

Waxaa muhiim ah in aad Maaskarada si sax ah u isticmaashaa


1. Maaskarada inta aad xiranin iyo markaad iska bixisid, mar walbo Gacmaha dhaq.
2. Maaskarada qeybta cinjirka leh ama Xarkaha leh taabo oo afka iyo Sanka ku aadi. Badanaa qeybta gudaha ee Maaskarada waa cadaan, qeybta banaanka xigta waxeey leedahay midib (cagaar ama buluug). Wa in meesha Sanka ku aadan eey ahaato mid dabacsan oo adag korna ku aadan.



3. Xarkaha Maaskarada waxaa ku xirtaa gadaal Madaxa ama midka cinjirka leh dhagaha ku suro. Maaskarada waa in ay si adag. Wajiga loogu xiro.



4. Maaskarada u jiid kor ilaa iyo Sanqaroorka hoosna ilaa Garka hoostiisa.



5. Sanka dhinacyadiisa waa in aad si dhab ah u qabataa qeyta ku aadan Maaskarada.



6. Sidaas ayee si sax ah kuugu xirantahay Maaskarada. Dadka xirto Okiyaalaha waxaa muhiim ah, Marka hore Maaskarada ka dibna Okiyaalaha xiro. Garka iyo tintiisa waxeey yareeyn karaan waxqabadka Maaskarada.



7. Inta aad xiran tahay Maaskarada ha taabanin Afka iyo Sanka.



8. Hadii Maaskarada eey ku qooydo neefsashada wa in aad iska badashaa.



9. Markaad isticmaashid Maaskarada si taxadar leh u bixi, waxaana ka qabataa qeybta Xariga ama Cinjirka leh.



10. Maaskarda si dhaqsi ah ku rid meesha Qashinka. Maaskarada la isticmaalay ma aha in meelaha lagu tuuro.

